



## Bilaalow, salaada aqiim oo noogu raaxee

Saalim Binu Abii Jacdi Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: nin ayaa yiri: shalaytadaydee maan tukado oo aan nasto, waaba iyadoo aad moodid inay arinkaa ku ceebeeyeen, wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay scw waxaan maqlay isagoo dhahaya: "Bilaalow, salaada aqiim oo noogu raaxee".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Abuu Daa'uud]

Nin asaxaabta ka mid ahaa ayaa yiri: shalaytadaydee maan tukado oo aan raaxaysto, dadkii la fadhiyey ayaa arinkaa ku ceebeeyey, wuxuu yiri: Nabiga scw ayaan ka maqlay isagoo dhahaya: Bilaalow! kor u qaad aadaanka oo salaada aqiim, si aan ugu raaxaysano, taasina waa waxa ku jira salaada ee ah Ilaahay la sheekaysigiisa iyo raaxada ruuxda iyo qalbiga.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65095>

النجاة الخيرية  
ALNAJAT CHARITY

